

Tilmaan-bixinta bukaan-socodka  
loogu talagalay

## Cudurrada [Kalamidiya/gonokocker] ama Mycoplasma genitalium Shaybaarka kaadida


### WAXYAALAHAAAN AYAA U BAAHAN TAHAY

Koob blaastiik ka sameeysan. Bakeerigii shaybaarka laga soo siiyay rugta daryeel-caafimaadeedka. Daawada khasacadda ku jirta halis ma aha haddii hab caadi ah loo adeegsado. Haddii daawada ay maqaarkaaga gaarto biyo isaga dhaq.


### SIDATAN YEEL




Iska qaadida shaybaarka kahor waa in ugu yaraan hal sac ay ka soo wareegatay tan iyo markii ugu dambaysay ee aad kaadiyeeysay.



- 1) Marka hore inyar, qiyaastii afar meelood hal desiliter ku kaadi koob nadiif ah.
- 2) Kaddib musqusha ku kaadi.




Adigoo taxadar ka ah furka ka saar tuubada. Hoorka waa in u tuubada ku hara.



Adigoo adeegsanaayo qoriga dhuuban [pipetten] ka soo duuq kaadida koobka ku jirta.


Kaadida ku dhexjirta qoriga dhuuban ku wareeji tuubada, heerkeeda waa in loola sima **labada falaar** dhexdooda ee ka muuqdaan dariishada tuubada.



Si fiican furka ugu xir tuubada.



Adigoo adeegsanaayo istikerkii daryeel-caafimaadeedka laga soo siiyay, ku qor **tuubada** magacaaga, tobbanka lambar ee aqoonsiga, taariikhda shaybaarka iyo saacadda.



Isla maalintaa aad shaybaarka iska qaaday waa inaad daryeel-caafimaadeedka gacanta ka saarta. La kaalay kaarka aqoonsiga.